



# Gaarigeyga ayaa la iga jiitay. Dib ma u soo ceshan karaa alaabadeyda?

My car was towed. Can I get my things back?

## Ciddee ayaa jiidi karta gawaarida?

Gaarigaaga waxaa jiidi kara magaaladda ama shirkad gaar loo leeyahay oo gawaarida jiida. Waxaa laga jiidi karaa wado magaaladda ku taal ama goob dad gaarihi leeyahay.

## Goorma ayey gawaarida jiidaan?

Gaariga waa la jiidan karaa oo "la haysan karaa" dhawr sababood dartood:

- Si aan sharci aheyn ayaad u dhigtay, ama meel ayaad uga tagtay muddo dheer
- Haddii aad dhigto dhinaca khaladka ah ee wadada xilliga xaaqitaanka barafka.
- Haddii ay jiraan tigisho badan oo aadan bixin.
- Haddii uu gaariga jabo oo aadan dhaqaajin intii muddo ah
- Haddii aad shil ku gasho wadadda weyn (highway)

Haddii ay taasi dhacdo, waxaa laga yaabaa inaad alaabadaada kala bixi karto gaariga haddii aadan gaarigaaga markiiba soo ceshan karin.

## Maxaa dhici haddii ay gaarigayga u jiidaan si sharco-darro ah?

Waxaad xaq u yeelan kartaa inaad ku dacawayso shirkadda gawaarida jiida lacagta iyo waqtiga kaaga dhumay wax ka qabadka gaarida jiididiisa. Waxaad kaloo ku dacaweyn kartaa khidmada aad bixisay – laakiin aysan ahayn inaad bixiso – waayo jiididu waxa ahayd sharci-darro.

## Sidee ayaan ku ogaanayaan halka uu yaalo gaarigeyga?

Waxaa laga yaabaa inaad gaarigaaga uu yaalo goobta gawaarida la dhigo ee magaalada ama meel gaar ah oo shirkadda qandaraaska heysata leedahay. Waa aad wici kartaa xafiiska magaalada gaariga loo qaaday.

Haddii gaarigaaga laga jiiday goobta gawaarida la dhigto oo gaar loo leeyahay ama goob ganacsi, oo ay ku taalo calaamad ay ku qoran tahay magaca iyo telefoonka shirkadda gawaarida jiida.

Waxa aad isku dayi kartaa inaad wacdo goobaha gawaarida la jiido la geeyo ee degaanka ama aad firiso bogooda haddii ay hayaan gaarigaaga. Ma jiro number ama bog internetka ah oo laga eegi karo gobolka oo dhan. Waa inaad baartaa goobta la geeyo gawaarida la jiido ee magaalada ama degmada.



Haddii gaariga ay jiido ama ay dhigto goobaha gaadiidka la dhigo hay'ad ka tirsan dawladda, waxaa laguu soo dirayaa 5 cisho gudahood waraaq ay ku cad yihiin:

- Xilliga gaarigaaga la jiiday iyo halka laga jiiday.
- Maclumaadka ku saabsan gaarigaaga, sida sanadka, cidda sameysay, nooca iyo lambarka taxanaha ah ee gaariga.
- Halka uu yaalo gaarigaaga

Waraaqda waa in ay sidoo kale kuu sharaxdo

- Xaqa aad u leedahay in aad gaarigaaga dib u soo ceshato iyo lacagta lagaa doonayo in aad bixiso.
- Maxaa dhacaya haddii aadan la soo xiriirin si aad u hesho gaarigaaga muddo gaaban
- Mudada aad heysato in aad ku qaadato gaarigaaga
- Sida aad ku heli karto alaabada gaariga kaa saaran

**Isku day inaad ugala soo baxdo gaarigaaga meesha la geeyey sidda si ugu dhaqsaha badan ee aad awodo! Cadadka lacagta ah ee lagugu leeyahay kor buu aadaa maalin walba oo uu gaarigu meeshaa siiyaal.**

### **Ma kala soo bixi karaa alaabada gaariga iga saaran?**

Haddii dakhligaagu yar yahay, sharciga gobolku waxa dhigayaa in gaariga lagaa jiiday aad kala soo baxdo dhamaan alaabada kaa saaran. Taasi waa alaabada ku jirta **gudaha** gaariga. Ma aha biraha gaariga sida taayarada, batariga, raadiyaha ama DVD, qalabka ku rakiban gaariga. Xitaa haddii uu yahay qalabka DVDga ama kan miyuusingga ee aad ku rakibtay gaariga ma qaadan kartid.

Waa in aad weydiisataa oo alaabada kala soo baxdaa ka hor taariikhda laguu qabtay. La xiriir goobta la dhigay gaariga sida ugu dhaqsaha badan! Waxaa suurogal ah inaad heysato wax aan ka badneyn 15 cisho haddii gaariga la geeyey goobta la dhigo gawaarida ee Minneapolis ama St. Paul. Waxaa suurogal ah inaad heysato ilaa 45 cisho haddii gaariga la geeyey goobta la dhigo gawaarida Minnesota gudaheeda. Waa in aad keyntaa cadeyn in aad tahay mulkiilaha gaariga. (akhri xagga hoose)



## **Lacag miyaa la iiga qaadayaa in aan kala soo baxo karaa alaabada gaariga iga saaran?**

Waxa ay ku xiran tahay dakhligaaga iyo haddii aad qaadato gargaarka dawladda. Haddii aanu dakhligaagu yareyn oo aadan qaadan gargaarka dawladda lacag ayey kaa qaadi karaan iyo dhamaan lacagta gaariga lagu jiiday oo meel lagu dhigay iyo lacagta kale ee lagugu leeyahay haddii ay jirto. LAAKIIN, haddii uu dakhligaagu yahay alaabada waxaa lagugu siinayaa lacag la'aan haddii aad la timaado cadeyn ah in aad tahay mulkiilaha gaariga oo ay tahay in lagaa yareeyo lacagta maadaama lagu siiyo (gargaarka dawladda).

## **Sidee ayaan ku cadeyn karaa taas?**

Si aad u cadeyso in aad ka soo baxdo shuruudaha lagaaga yareynayo lacagta "maadaama lagu siiyo gargaarka dadweynaha," waraaq ka soo qaado degmada, legal aid ama hay'ad kale oo aan faa'iido doon aheyn oo cadeysa in aadan heysan hoy ama aad gargaar ka hesho mid ka mid ah barnaamijyadan:

- MFIP ama DWP (Barnaamij shaqo oo dadku saacadi shaqeeyaan)
- Caymiska caafimaadka gobolka (MA) ama MinnesotaCare
- Gargaarka guud (GA) ama gargaarka degdegga ah (EGA)
- Gargaarka kabitaanka ah ee Minnesota (MSA)
- Gargaarka MSA ee degdegga ah.
- Gargaarka tamarta
- Gargaarka SNAP benefits (cuntada)
- Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI)

**AMA-** waxa aad keeni kartaa cadeyn muujineysa inaad ka soo baxday shuruudaha ku xiran:

- Canshuur dhaafka dakhliga (EITC) ama canshuur dhaafka qoysaska shaqeeya ee Minnesota
- Adeegga legal aid

## **Yaa alaabada kala soo bixi kara gaariga la geeyay goobaha lagu xareeyo gawaarida?**

Inta badan mulkiilaha gaariga ayaa kala soo bixi karaa laabada aariga saaran. Qaar ka mid goobaha la dhigo gaadiidka way ogolaadaan in qof kale qaadi karo alaabada haddii uu la yimaado waraaq uu mulkiilaha ku ogolaanayo oo leh shaabadda nootaayada. Waa in mulkiiluhu weli cadeeyaa in uu yahay hoy laawe, la siiyo gargaarka dadweynaha ama adeegga legal aid ku heli karo lacag la'aan.



Haddii aadan laheyn gaariga, laakiin ay alaab kaa saaran tahay, goobaha qaarkood waxa ay ogolaadaan in aad kala bixi karto alaabadaas haddii aad cadeyn karto in aad leedahay. Tusaale ahaan, haddii ay kaa saaran tahay aqoonsi, boorso magacaaga ku qoran yahay ama dhalo daawo ah.

## **Maxaa dhici haddii aysan i siin alaabtayda?**

Kow, waa inay ku siiyaan ogaysiis kuu sheega adiga sababta ay isu leeyihiin inaadan xaq u lahayn in alaabtaada laguu soo celiyo.

Haddii AAD xaq u leedahay waxaaga in laguu soo celiyo, laakiin aysan wali kuu soo celin, waxa aad xaq u leedahay inaad maxkamad tagto. Wuxuu aad waydiisan kartaa xaakim inuu amro shirkadda jiidida gawaarida ama meesha gaariga lagu haysto inay kuu soo ceshaan alaabtaaddii. Kolkaa, haddii maxkamaddu ay bixiso amarkaa, shirkadda jiididda gawaariddu ama meesha gaarida lagu haysto sidoo kale waa inay bixiyaan khidmadda kaaga baxday qareenkaaga.

Haddii aysan kuu soo celin alaabtaadda AYNA tuuraan waxaaga, waxa aad xaq u leedahay inaad maxkamad tagto. Haddii aad ku guulaysato dacwadda, shirkadda jiididda gawaarida ama meesha gaariga la geeyey waa inay ku siiyaan \$1,000 iyo waliba khidmadda kaaga baxday qareenkaaga.

## **Gaarigeyga ma ku soo ceshan karaa lacag la'aan?**

Maya. Marna xaq uma lihid in aad gaarigaaga lacag la'aan ku heshi iyada oo aan loo eegin xaaaladda dakhligaaga.

## **Haddii gaarigaaga dib lagaaga ceshtay**

Haddii gaarigaaga dib lagaag ceshtay, ma heysan karaan alaabada kaa saaran gaariga. Waa in aad la hadashaa cidda gaariga dib u ceshatay (bangiga ama deyn bixiyaha) si aad u ogaato sida aad ku heli karto alaabada kaa saaran gaariga.



*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdhaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.